

Tallaalada COVID-19 ee loogu tallogalay xubnaha OHP iyo CWM



Ahaanshaha badbaado waa muhiim. Ha joojin caadooyinkaaga badbaadada ee wanaagsan.

Tallaalku wuxuu na siinayaa rajada in cudurka safmarka uu dhammaanayo, laakin waqtigaan la joogo, waxaan u baahannahay inaan sii wadno tallaabooyinka badbaadada ee looga illaalinayo fayraska faafida:

- Xiro maaski
- Ka fogow 6 fiit dadka kale
- Gacmahaaga dhaq
- Ka fogow isu imaanshaha
- Guriga joog markii aad jiran tahay

Su'aalaha iyo jawaabaha

Imisa ayuu kharash ahaan igu tagayaa tallaalka COVID-19?

Tallaallada COVID-19 waxay bilaash u yihiin xubnaha OHP iyo CWM.

Miyaan helayaa tallaal haddii aan horay u qabay COVID-19?

Waad heli kartaa tallaalka xitaa haddii aad horey u qabtay COVID-19.

Waa maxay tallaal?

Tallaaladu waa daawo ka caawisa difaaca jirkaaga inuu ula dagaalamo caabuqyada si wanaagsan oo degdeg ah.

Tallaaladu ma badbaadaa?

Tallaalada COVID-19 waa wax ku ool boqolkiiba 95%. Tallaalada waxaa si taxadar ah looga tijaabiyay dhanka badbaadada.

Miyaa Oregon qaadayaa tallaabooyin dheeraad ah oo lagu hubinayo in tallaalku badbaado yahay?

Haa, Oregon waxaa uu qeyb ka yahay [Kooxda Shaqada Dib-u-eeqida Badbaadada Sayniska ee Gobolada Galbeed](#). Tani waxay gobolka siisaa lakab ilaalineed dheeraada oo uu ku hubinayo in tallaalada COVID ay buuxiyaan heerarka badbaado ee ugu sarreeya ka hor intaan la siin Reer Oregon.

Sidee ayaan waxbadan uga bartaa tallaalada Oregon?

Waxaad wax badan ka baran kartaa oo aad ka heli kartaa aqbaaraha [boggga](#) [tallaalka COVID-19 ee Oregon](#).

Waxaad ku heli kartaa tan luuqad kale, daabacaad balaaran, ama qaab kale oo adiga kuu wanaagsan. Soo wac 800-273-0557 (TTY 711).